Qoyska Xaanshida Xaqiiqada

# Natiijada Aan kala Cadeyn:

## Ogeysiinta Natiijada Dhiigga Laga Qaaday Ciribta

Barnaamijka Baaritaanka ilmaha dhasha ee Minnesota

**Borderline Newborn Screening Result, Family Fact Sheet—Somali**

## Natiijada Aan kala Cadeyn ee Baaritaanka

### Maxaa lagu ogaaday baaritaanka dhallaanka cusub?

Baaritaanka ilmaha dhashay oo la sameeyay ayaa lagu ogaaday in ilmahaagu laga helay natiijo aan kala cadeyn.

### Waa maxay natiijada aan kala cadeyn?

Natiijada Aan kala Cadeyn waxaa laga wadaa in baaritaanku muujiyay natiijo u dhexaysa xaalad caadi ah iyo xaalad aan caadi ahayn. Waxaa jira sababo kala duwan oo la xiriira sababta natiijooyinku u noqdaan kuwo aan kala cadeyn, ayna ku jiraan:

- Isbadellada caadiga ah ee ku dhaca jidhka ilmaha marka uu ku dhawaado inuu dhasho
- Ilmaha dhasha ayaga oo aan shin dhamaysan (dhicis)
- Ilmaha ku dhashay foosha dhibka badan ama walaaca badan
- Dhiiga oo u banbaxa kulayl iyo huur
- Daawooyinka qaarkood oo la siiyo hooyada ama ilmaha

Inta badan , ma kala cada sababta natiijadu u tahay mid aan kala cadeyn.

### Maxaa xiga oo dhici kara?

Dhakhtarka ilmahaaga ayaa amri doona baaritaanka ilmaha dhashay oo ku celis ah. Inta badan ilmaha laga helo natiijo aan kala cadeyn ayaan cilad laga helin marka baaritaanka lagu cesho. Hase yeeshee, sabab la xiriirta in xanuunnada lagu ogaado baaritaanka ilmaha dhashay ay daran yihiin, waa muhiim in lagu cesho baaritaanka oo la xaqiijiyo in ilmahaagu uusan qabin dhibaato caafimaad.

### Sidee ayaan ku helayaa natiijada baaritaanka ku celiska ah ee ilmahayga?

Marka dhiiga laga qaaday ilmahaaga la keeno shaybaarka baaritaanka, baaritaan ayaa la sameeyaa isla markaaba laakiin waxay qaadan karttaa dhawr maalmood. Natiijooyinka baaritaanka ayaa la siin doonaa dhakhtarka ilmahaaga ama rugta caafimaadka.

### Ka waran haddii baaritaanka ku celiska ah uu muujiyo xaalad caadi ah?

Haddii natiijadu caadi tahay, looma baahna baaritaan ama daawayn gaar ah. Looma baahan doono daryeel danbe ee caafimaad oo la xiriira natiijada aan kala cadeyn. Haddii aad su'aalo qabto, fadlan la hadal dhakhtarka ilmahaaga.

### Ka waran haddii baaritaanka ku celiska ah uu muujiyo natiijo aan kala cadeyn ama aan caadi ahayn markale?

Haddii baaritaanka ku celiska ah muujiyo natiijo aan kala cadeyn ama cilad, dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi doona baaritaan dheeraad ah ama daawayn la siin karo ilmahaaga.

### Dhigaalada

**Tixraaca Macluumaadka Hiddo-sidaha:** http://ghr.nlm.nih.gov

**Badbaadi dhallaankaaga Adoo U Maraya Baaritaano Aasaasi ah:** www.savebabies.org

**Baaritaanka Koowaad ee Dhallaanka:** www.babysfirsttest.org